



JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Liiska Cunaqabateynta Cusub 2025

XOG-SHAKHSIYEEDKA CUNAQABTEENTA LASAARI RABO (SANCTION LIST)		
XOGTA SHAKHSIGA KOOBAAD (PERSONAL DETAILS)		
	Magac dhamaystiran	Xuseen Cali Fiidow
	Naanays/Kunya	Xuseen Dayniile
	Qiyaasta dhalashada	1960
	Goobta dhalashada	Xaradheere, gobolka Mudug
	Qabiilka/Jifada	Hawiye/Murusade/Hilibi/Celi Gaab
	Deegaanka	Hambooy, Jilib (Jubada dhexe) iyo Kunyo-Barow (Shabellada Hoose).
FAALO	Madaxa Maktabka Siyasaada & Xalinta Wilaayatka Alshabaab sidookale Waa maskaxda ka danbeeysa kala qeeybinta beelaha Soomaaliyeed iyo hurinta colaadaha qabiilka si uu u sugo jiritaanka kooxda. Wuxuu sharciyeeyaa xasuuq iyo cabburin, isagoo ka mid ah kuwa ugu firfircoon ee dhibaatooyinka lagu sii haysto shacabka. Doorkiisa wuxuu astaan u yahay sida kooxdu u adeegsato qabyaaladda si ay u sii jirto, una kala furfurto isku duubnida bulshada Soomaaliyeed.	
XOGTA SHAKHSIGA LABAAD (PERSONAL DETAILS)		
	Magac dhamaystiran	Cabdullahi Xasan Cabdi Cosoble
	Naanays/Kunya	C/laahi wadaad
	Qiyaasta dhalashada	1967
	Qabiilka/Jifada	Hawiye/Abgaal/ Daa'uud

FAALO		C/laahi wadaad waa Amiirka maktabka Maaliyada Al-Shabaab waana maskaxda ka dambeeyso baada iyo dhaca ay kooxdaan Qawaarijta-ah ku heeyso umada soomaaliyeed. Waxa uu door muhim ah ku leeyahay bixinta mushaaraadka dhalinyarada ay galdeen, iyo dhaca hantida baada-ah oo ay kooxdu u adeegsato gumaadka shacabka Soomaliyeed. Dambiilahan waxa ay horay ugu magacaaben xilal-beenaad kala duwan sida u qaabilsanahooda Zakawaadka Banadir iyo shabeelada dhexe haatan na waa madaxa maktabka maaliyada ururka argagixisada	
XOGTA SHAKHSIGA SADAXAAD (PERSONAL DETAILS)			
	Magaca	Yaasiin Weheliye	
	Naanays/Kunya	Yaxye/Muftiga	
	Qabiilka/Jifada	Hawiye/Habargidir/Saleebaan/Gaabane	
	Qiyaasta dhalashada	1980	
FAALO		Wuxuu masuul ka yahay dejinta fikirka xagjirka ah ee diimeed waxuu sharciyeeya falalka guracan ee kooxda. Wuxuu si bareer ah ugu adeegaa in uu dadka ku qanciyo in dilka, qaraxyada, iyo caburinta bulshada ay yihiin “jihaad”, taasoo si cad uga hor imaaneysa diinta suuban ee Islaamka. Wuxuu ka mid yahay kuwa ugu halista badan ee sababay inuu daato dhiig badan. Yaasiin waxa uu sharciyeeyaa baadda laga qaado shacabka iyo ganacsatada, sidoo kalena u fatwoodaa handadaadda iyo ciqaabta lagu fuliyo dadka iska diida baaddaas.	
XOGTA SHAKHSIGA AFAARAAD (PERSONAL DETAILS)			
LAMA HAAYO	Magaca	Cabdullahi Tahliil Xiirey	
	Naanays/Kunya	Jeeri	
	Qabiilka/Jifada	Hawiye/Duduble/Maxamed camal	
	Qiyaasta dhalashada	1986	
FAALO		Jeeri wuxuu madax ka yahay guud ahaan soo iibinta hubka, keedintiisa iyo dib u yactirka hubka ciladooba. Wuxuu maamulaa shabakadaha hubka ka ganacsada ee gudaha dalka iyo dibadiisa ku sugan. Waxaa la shaqeeyaa dad kala duwan oo isugu jira cirtoogtooley iyo ganacsato u qaabilsan maareynta lacagaha uu hubka ku soo iibiyo.	
XOGTA SHAKHSIGA SHANAAD (PERSONAL DETAILS)			
LAMA HAAYO	Magaca	Bashiir Cabdiraxmaan Xandulle	
	Naanays/Kunya	Bashiir /Guuleed/Furqaan	
	Qabiilka/Jifada	Dir/Isaaq/Arab/Cabdalle	
	Qiyaasta dhalashada	1950	
FAALO		Waa Taliyaha guud ee ciidamada Alshabaab ahna gudoomiyaha Golaha Ciidamada Waa maskaxda ka dambeysa weerarro badan oo qorsheysan oo lagu beegsaday dad rayid ah oo aan waxba galabsan. Wuxuu si toos ah u abaabulay dagaallo dhiig badan ku daatay, kuwaas oo horseeday fiditaan colaado joogto ah, barakac baahsan, iyo burbur dhaqaale iyo bulsho oo aad u ba’an. Ficilladiisa guracan ayaa astaan u ah xasuuqa, qalalaasaha, iyo xasilooni-darrada joogtada ah ee kooxda ay ku hayso shacabka Soomaaliyeed	
XOGTA SHAKHSIGA LIXAAD (PERSONAL DETAILS)			
LAMA HAAYO	Magaca	Maxamed Yare Macallin Axmed	
	Naanays/Kunya	Abdiwahid / Madyare / Axmedeey	
	Qabiilka/Jifada	Mirifle/Yantaar.	
	Qiyaasta dhalashada	1978	
FAALO		Garsoorka guud ee kooxda Wuxuuna mas’uul ka yahay go'aan ka gaarista xukunada guracan ee maxkamadaha kooxda, kuwaas oo lagu fuliyo ciqaabaha adag ee lagu cabburiyo dadka ka hor yimaada amarada kooxda, ama lagu eedeeyo ku xadgudub	

	diimeed. Wuxuu door weyn ku leeyahay cabsi gelinta bulshada iyo adkeynta gacanta adag ee kooxda ku leedahay meelaha ay maamusho.	
XOGTA SHAKHSIGA TODOBAAD (PERSONAL DETAILS)		
LAMA HAAYO	Magaca	Cabdullaahi Macallin Geedow
	Naanays/Kunya	Macalin Geedow
	Qabiilka/Jifada	Mirifle/ Elaay
	Qiyaasta dhalashada	1979
FAALO	Amiirki hore ee zakawatka, hadane madaxa Jabhada Golis/puntland sidookale na Wuxuu door toos ah ku lahaa baadida iyo cadaadinta dhaqaale ee lagu hayo shacabka Soomaaliyeed, iyadoo xoolahooda iyo ganacsigooda si khasab ah looga qaado “zakawaat” aan sharciyad lahayn. Dhaqaalahaas uu ururiyo waxaa lagu maalgelin jiray howlaha arxan-darrada ah ee kooxda, taasoo ka dhigaysa mid si toos ah uga qayb qaatay burburinta ilaha nolosha ee bulshada.	
XOGTA SHAKHSIGA SIDEEDAAD (PERSONAL DETAILS)		
LAMA HAAYO	Magaca	Yuusuf Sheekh Ciise Axmed Gacal
	Naanays/Kunya	Kaba kutukade
	Qabiilka/Jifada	Hawiye/Abgaal/Waceysle
	Qiyaasta dhalashada	1965
FAALO	Gudoomiyaha gobolka shabellaha dhaxe Wuxuuna maamulaa nidaam caburin & xoog ku dhisan oo lagu dhibaateeyo shacabka gobolkaas. Waxa uu fuliyaa amarro cadaalad-darro ah, isagoo adeegsanaya cabsi gelin, baad, iyo xukunno lagu cabburo dadka deegaanka. Wuxuu door muhiim ah ku leeyahay kala firdhinta bulshada iyo burburinta haykalka nolosha rayidka.	

===DHAMAAD===